

Website Info

Neues vom Papaclub

Sidaad laga yaabo inaad ka warhaysaanba waxaa jiray Ururka Aabayaasha ilaa bilowgii sanadkan.

Kulanka Aabayaashu waxaa la qabtaa bishiiba hal mar, maalin jimce ah saacada 18:00 ilaa 20:00.

Aad baan ugu faraxsanahay in markale qayb kamid ah guriga Vielinbusch dib loo furo. Maadaama Ururka Aabayaashu kulanka xiga uu qabsoomi doono bisha Juun ee soo socota, waxaan idinku casuumaynaa inaad nagala soo qayb-gashaan.

Kulanka internetka ee Ururka Aabayaasha

22 May 18:00 fiidnimo

Mawduucuna waa “Guriga in Caruurta wax lagu baro”

Mawduucani waa muhiim maadaama uu iskuulku imika mudo isbuucyo ah uu xidhan yahay. Dabcan inaga Aabayaasha ahna tacliinta caruurteena aad bay qalbigeena ugu dheer tahay.

Waxaan doonnaa inaan caruurteena caawino!

Waa in caruurteenu dhibco fiican iskuulka ku guulaystaan ama ku baasaan, sababtuna waa mustaqbalkooda baa ku xidhan dhibcahaas. Ta kale caruurteenu waa aayaheenii ama mustaqbalkeenii.

Waxan ku guulaysanay inaan soo casuumano Herr Walker oo ah nin ku takhasusay arimaha waxbarasha ee bulshada oo kashaqeeya Realschule Tannenbusch si uu inoola wadaago wixii talo iyo tusaale ah eek u saabsan arimaha waxbarashad guryaha imika lagu dhigo.

Waxan ku wada hadli karnaa luqadaha Jarmalka, Somaliga, Ingiriis, Carabi, Urdu iyo Isbaanishka.

Aabaan kuu soo dhawaynaynaa uguna faraxsan nahay. Nagala soo qaybgal kulankan.

Halkan [riix](#) ama guji si aad kulanka internetka uga qaybgasho:

<https://us02web.zoom.us/j/84970313058?pwd=Qm9sa0RhVkw3dUJrRlExR3NmTkj3QT09>

Meeting-ID: 849 7031 3058

Ma jirtaa wax talo ah ama tusaale ah, ama soo-jeedin ah oo kusaabsan kulanka xiga?

Fadlan nagala soo xidhiidh. 0228/76363873 ama E-Mail an: ackermann@vielinbusch.de

Waxaa ku salamaya.

Samir, Jürgen, Mahamud iyo Abdihakim oo ah hawl-wadeenada Ururka Aabayaasha.

Balamada xiga ee kulanka Ururka Aabayaasha ee habeenka jimacaha ah qabsoomi doona inta lagu guda jiro sanadkan badhkiisa hore waa sidan soo socota:

Jimcaha 26.06 mawduuca wali la islama meel dhigin.


Dalxiisyada gaagaaban ee soo socda inta lagu jiro fasaxa waa sidan:

Balamada la qorsheeyay waa:

Sabti, 22.07., 25.07., 01.08., 06.08. iyo 08.08.2020:

Dalxiis gaaban oo loogu talagalay Aabayaasha iyo caruurtooda iyo kuwo loogu talagalay qoyska ama reerkoo dhan.

Gefördert durch:



aufgrund eines Beschlusses
des Deutschen Bundestages

